



XAANSHI TILMAAN-BIXINEED

Waqtiga Cuntada



Waqtiyada cuntadu aad ayay muhiim ugu tahay nolsha qoyska. Waxay qoyska siiyaan daqiiqado gaar ah oo qoysku ay ku wada hadlaan meelna isugu yimaadaan. Waxa kale oo waqtiyadaasi u yihiin ilmahaaga fursad weyn oo uu ku barto inuu miiska fariisto, oo uu si madax-bannaan wax u cuno waxna u cabbo. Si waqti nidaamsan oo wax la cuno looga gaaro guul, waxay u baahan tahay tixgelin gaar ah.

Marka guriga la joogo, waxaa muhiim ah in la sameeyo nidaam joogto ah oo badbaadsan, caafimaadqaba, oo hubanti ah oo barbaarinna leh. Waxyaalaha ay haboon tahay in la xusuustana waxaa ka mid ah: xasaasiyadda, cuntada gaarka ah/cuntada la xakameeyay, iyo inaad siiso ilmaha cunto iyo qeybo daboolaya baahida nafaqeed oo ilmahaagu u baahan yahay iyo awoodda ay u leedahay inay wax calaaliso waxna ay liqi karto.

Waxaa waajib ah bey'ad hubanti ah oo barbaarinna leh waqtiga cuntadu inay ku jiiraan arrimahan soo socda:

- miiska cuntada oo la tago
- nidaam cunto iyo filasho oo la sameeyo
- asluub ahaan tusaale fiican oo loo noqdo ilmahaaga
- ilmahaaga oo aad ka caawiso inuu iskiis wax u cuno
- xirafdo ijtimaaci ah iyo wada hadal aad la samayso ilmahaaga inta miiska la fadhiyo

- in aad samayso waxqabadyo u oggolaanaya ilmahaaga inuu asna sameeyo xirafadda cusub

Waxyaabahan soo socda ayaa ah qaar ka mid ah tusaalooyin kaa caawin doona inaad qorsheyso nidaam waqti oo wax la cuno oo aad 'u diyaariso ilmahaaga' inuu la kulmo waayo-aragnimo hubanti ah.

Qorsheynta miiska lagu tegayo

- Cuntada ka hor, la samee ilmahaaga waxqabad gaaban oo xasillan oo aan buuq iyo qeylo toona lahayn sida midabeynta, akhriska ama ka shaqeynta waxyaabaha xujada leh maskaxdana ka shaqeynsiiya. Taas ayaana ka caawin doonta ilmahaagaa inuu nasto, dhegaysto, oo uu raaco wixii jihayn ah.
- Digniino sii ilmahaaga ka hor intaadan u gudbin marxalad kale. Haddii ay suurtagal tahayna, adeegso wax uu wax ku xussusto oo afka aad uga sheegto iyo wax aadan afka uga sheeginba si ilmahaagu u fahmo farriintaada. Tusaale ahaan, waxaad oran karta, "Shan daqiiqadood gudahood, waxaynu xirxiran doonnaa qadada" ama tusi ilmahaaga astaan sawir oo muujineysa "waqtiga cuntada" oo ay wehiliyaan ereyadaaduna.



Waqtiga Cuntada, waa socotaa

- Saacad dhawaaqaysa waqtiga ku buuxi si uu ilamahaagu u “arko” una “maqlo” inay shantii daqiiqadood dhammaadeen.
- Haddii ilmahaagu ciyaarayo ka hor waqtiga cuntada, ku dhiirrigelin inuu meesha hagaajiyo. Soo dhoweyso baaldi si uu ilmahaagu u garto meesha uu ku ridaayo waxyaalaha uu ku ciyaaro.
- Ka takhalus dhammaan wixii ilmahaaga jeedinaya waqtiga la cuntaynayo. Hubi inayna meesha ka muuqan waxyaalaha uu ku ciyaaro ilmahaagu, telefishankana ka demi.

Nidaam mugda ah u deji waqtiga cuntada iyo wixii aad filaneysaba

Marka aad nidaam dejiso, waxay fahmaan carruurta inaan la oggoleyn asluubta qaarkood. Marka aad u samayso nidaam fudud oo uu raacana, wuxuu ka caawin doonaa ilmahaaga inuu lahaado dareen is-xakaymayn ah iyo inuu jeclaysto inuu kula shaqeeyo.

- Nidaamkana waa in aad loogu dhawaaqo waana in/ama lagu qoro jumlado ka kooban labo ilaa saddex erey. Waxaa kale oo suurtagal ah inaad jeclaysato inaad isticmaasho taageerooyin muuqaal ah sida boodhka lagu qoro wixii nidaam ah ee la rabo in dad loo gudbiyo waana in lagu dhejiyo meel u dhow meesha lagu cunteynayo.
- Nidaamkana yaree oo yaanu badan.
- Intaadan dhejin ka hor, kala hadal ilmahaaga nidaamka, ama hakaa caawiyo ilmahaagu samaynta nidaamka.

Asluub Tusaalenimo

Waalid ahaan waxaad tahay ilmahaaga macallinkiisa ugu horreeya. Ilmahaagu wuu ku eegaa waanu kugu deydada, asagoo ku celcinayanan, wuxuu bartaa asluubta la aqbali karo. Isku day afkaarta soo socota si aad sare ugu qaaddo akhlaaqda miiska ee habboon.

- La fariiso ilmahaaga miiska hakaagana deydo nooca asluubta wanaagsan oo aad asagana ka filaneyso.
- Tusaale fiican carruurtaada kalena ha’u noqdaan ilmahaaga. Ilmahaagana ha ag fariistaan, ama meel ka soo horjeedaba si uu ugaga deydo siday naftooda u cunteysiinayaan iyo asluubta habboon ee miiska

marka la fadhiyo.

Ka caawinta ilmahaaga siduu u baran lahaa inuu asagu naftiisa cunteysiyo

Inuu barto inuu si madax-bannaani ah u cuno cunto ama wax u cabbo waxay ku qaadan doontaa ilmahaaga waqti iyo tababbar badan. Marka aad u samayso waxoogaa wax-kal-beddelaad ah, ama aad ka beddesho meesha uu ilmahaagu wax ku cuno iyo/ama weelka (fargeetada ama qaadada) uu isticmaalo, waxaad ka caawineysaa inuu madax-bannaanaado oo uu dhisto isku kalsoonidiisa.

Ka feker tusaalooyinkan soo socda si aad sare ugu qaaddo madax-banaanida ilmahaaga:

b) Sida loo kala fadhiisanayo miiska cuntada

- Hubi inuu ilmahaagu yeesho meel isagu uu gaar ah oo uu ka fariisto miiska cuntada
- Istimaal dermooyin yar-yar oo ilmahaaga iyo xubnaha kale oo qoysku ay yeeshaan. Taas ayaa ka caawin doonta ilmahaaga inuu garto meesha asaga u gaarka ah. Waxaad ku dhejin kartaa dermada yar dusheeda sawirrada ilmahaaga oo lagu dahaaray balaastik laga dhex arki karo masawirka ku jira, ama waxaad isticmaali karta midab gaar ah oo ilmahaagu uu garan karo. Waanu ka faa’iideysan karaa tilmaamahaasi muuqaalka ah.
- Hubi in habka loo kala fariisanayo miiska ay dabooli karto baahida ilmahaagaa (tusaale, inaad fariisido meel uu jecel yahay ilmahaagu inuu ka fariisto miiska cuntada, inuu ag fariisto qof weyn waa intaasi oo uu caawimo u baahdo.

t) Meeshuu fariisanayo ilmuhu

- Waxaa waajib ah inuu ilmahaagu awoodi karo inuu fariisto asagoo cagaha ku haya sagxad adag oo aan dhaqaaqayn. Haddii ay lagama maarmaan noqotana, isticmaal kursi dheer oo caga-dhig leh si uu taageero u siiyo cagihisa.
- Adeegso una dulsaar kursiga salli yar oo ka samaysan caag si aanu ilmuhu uga dhicin kursiga.
- Haddii uu ilmahaagu isticmaalo kursiga curyaamiinta, hubi inay jirto meel uu mari karo uguna gudbi karo miiska cuntada iyo meel ku filan oo uu ka helo miiska cuntada.

j) Tallaaooyin/kala-beddelidda fargeetooyinka, suxuunta iyo koobabka

Waqtiga Cuntada, waa socotaa

- Haddii ay suurtagal tahay, isticmaal suxuun iyo weel (maacuun) aan waaweynayn looguna talo galay carrruta.
- Haddii ilmahaaga ay dhibaato ka heysato inuu dhaqaajiyo gacmihiisa iyo farihiisa, waxaa u hawl yaraan doonta inuu qabsado qaaddo ama fargeeto haddii daabku uu weyn yahay.
- Qarada qaadada ama fargeetada ayaad u weyneyn kartaa ama u dheerayn kartaa adigoo ku qabanaya kuna adkaynaya qaadada ama fargeetada isbuunyada timaha lagu galgalooliyo ama ka dhigta wax laalaaban ama gobol isbuunyo ah oo wareegsan.
- Saxni leh qar ayaa cuntada ku hayn doona saxniga intuu ilmahaagu ka baranayo inuu qaato cuntada.
- Koobabaku waa inay ayana noqdaan kuwo aan waaweynayn oo carruurta loogu talo galay.
- Markuu ilmahaagu ka gudbayo quraarad wax-ka-cabbidda una gudbaayo inuu koob wax ka cabbo, ugu shub koobka qaddar aan badnayn oo dareere ah. Taas ayaa joojin doonta saxashada yarayna doonta inay wax ka qubtaan (daataan) ilmaha.
- Intaas waxa dheer, bar ilmahaaga inuu koobka ku qabsado labada gacmood, ilaa inta uu diyaar u noqonaayo inuu ku qabsado koobka gacan keliya.



x) Tallaabooyin fudud oo sare loogu qaado madax-bannaanida

- Marka hore, waxaa suurtagala ah inaad caawiso ilmahaaga adigoo gacantaada midig dul-saaraya gacantiisa si aad u hagto dhaqdhaqaaqiisa markuu wax cunaayao waxna cabbaayo. Si-tartiib tartiib ahna, caawimaadda ka jooji, ama ka yaree isla marka uu ilmahaagu bilaabo inuu horumar iskiis ah uga gaaro xirafadaha wax lagu cuno. Tabahaasina waxaa kale oo loo yaqaan “kicin” iyo “dhadhid”. Wixii tafaasiil ahna arag sanduuqa Wixii

Macluumaadka Dheeriga Ah.

- Hadafku waxa weeye, ugu dambeynta, caawimaad loo baahan mayo ilmahaaguna iskiis ayuu wax u cuni doonaan.

Ku camal-falidda wada-xiriirka iyo xirfadaha ijtimaajiga ah

Waxaad sare u qaadi kartaa horumarka ilmahaagu ka gaaro xirfadaha ijtimaajiga ah inta wax la cunaayo, sida codsiga nooca cuntada. Waxaa kale, oo ilmahaagu xiiseyn doonaa marka uu asagu noqdo qof wax caawiya, sidaas darteedna, waxaa suurtagal ah inaad jeclaysatid inaad tixgeliso inaad u-oggolaatid inuu ka qeybqaato hagaajinta miiska cuntada, oo cuntadana uu dadka siiyo, marka cuntada la dhammaystana uu meesha nadiifiyo. Sidaas ayaad sare ugu qaadaysaa madax-bannaanidiisa, iyo inuu yeesho dareen mas’uuliyadeed, oo aad ku dhisayaa isku-kalsoonantiisa.

Qabashada waxqabadyada u oggolaanayaa ilmahaaga inuu ku camal-falo xirfadaha cusub

U samee ilmahaaga maalinta oo dhan waxqabadyo uu ku tababbarto xirfadaha “waqtigiisa cuntada”. Waxaanad isku dayi kartaa waxqabadyo ay ka mid yihiin cunto-karinta (tusaale, diyaarinta cunto hawl-yar, ama cunto fudud), sallaxid meel carruurto ku ciyaarto kuna dhex taal makhaayad iyo akhris sheekooyin ku saabsan waqtiyada cuntada.

Nidaamka waqtiga cuntada waxa looga dan leeyahay inuu adiga, ilmahaaga iyo qoyskiinaba idiin noqdo waayo-aragnimo xiiso leh. Waqtiga aad geliso qorsheyn hore aad ugu sii samaysato nidaamkaasina waxa uu kuu sahlayaa inaad istareexdid kuna raaxeysatid natiijooyinka.

Raad-raac:

Cook, R.; Tessier, A.; Klein, D. (2000) Adapting Early Childhood Curricula In Inclusive Settings. Fifth Ed., Prentice Hall Inc.